

Xuquuqdaada markaad kireysanaysid: Xuquuqda Aadanaha ee Alberta

Guriyeynta waayeelka: Guriyeyn la awoodi karo

Ku noolaanshaha guryaha la awoodi karo

Sharciga Guriyeynta Alberta wuxuu abuura fursada dadka waayeelka ah si ay ugu noolaadaan guryaha ay awoodaan. Guryaha noocaan ah waxaa lagu bixiyaa Wasaaradda Waayeelka iyo Guriyeynta Alberta. Waxaa heli kara shakhsiyaadka u baahan caawimo helitaanka iyo ilaalinta guryaha sababo dhaqaale awgood.

Maxaad ka ogtahay Sharciga Guriyeynta Alberta:

- si toos ah uma siiyo waayeelka wax xuquuq iyo waajibaad ah.
- Waxay u ogolaataa, laakiin qasab maaha, Wasaaradda Waayeelka iyo Guriyeynta Alberta inay taageero maaliyadeed iyo mid bulsho u fidiso dadka waayeelka ah iyada oo loo marayo barnaamijyada guriyeynta.

Sharciga Guriyeynta Alberta wuxuu sameeyaa saddex barnaamijyo guriyeyn oo suurtagal ah:

- 1) Barnaamijka Guriyeynta Bulshada
- 2) Barnaamijka Guriyeynta Iskoolka ee waayeelka
- 3) Barnaamijka guryaha kala xidhan ee waayeelka

Barnaamijka Guriyeynta Bulshada iyo Barnaamijka Guryaha Iskoolada waayeelka labaduba waxaa looso bandhigaa in laga kaalmeeyo lacag bixinta kirada guryaha dadka waayeelka ee ay haysto dhibaato dhaqaale iyo bulsho. Kirada bil walba, oo ay ku jirto kulka, biyaha, iyo bullaacada, kiraystaha barnaamijkan waxay noqon doonaan boqolkiiba 30% dakhliga bisha ee qofka waayeelka.

Barnaamijka guryaha kala xidhan ee waayeelka wuxuu bixiyaa hal iyo laba qolal oo leh sariir oo ay lasocoto cunto iyo adeegyo nadaafadeed oo loogu talagalay dadka waayeelka ah ee shaqo ahaan madaxbanaan. Kooxaha maareynta guryaha ee Alokai ayaa dejiya kirada bil kasta, laakiin waa inuu bixiyo qof kasta oo waayeel ah ugu yaraan \$ 315.00 Carbuun ah.

Mararka qaar, ereyga, “taageerida nolosha” waxaa loo isticmaali karaa in lagu qeexo dadka waaweyn ee ku nool barnaamijka guriyeynta ee lagu bixiyo Sharciga Guriyeynta Alberta.

Ma jiraan wax cabasho ah ama nidaam rafcaan ama Daaweyn lagu heli karo Sharciga Guriyeynta Alberta.

Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Wixii macluumaad dheeraad ah, la xiriir Xarunta Xiriirka Taageerada Alberta. Caawinaad waxaa lagu helaa in ka badan 100 luuqadood. Taageerada Xarunta Xiriirka Alberta waxay shaqeysaa 7:30 subaxnimo illaa 8:00 fiidnimo, Isniinta ilaa Jimcaha. Waxay xidhaan dhamaadka usbuuca iyo maalmaha fasaxa

Booqo bogga Taageerada Alberta <https://www.alberta.ca/alberta-supports.aspx>

Wac Taageerada Alberta
Si bilaash ah (gobolka oo dhan): 1.877.644.9992
Edmonton iyo aagga: 780.644.9992

Haddii aad ka welwelsan tahay xad-gudub ama badqabka waayeelka ee ku yaal guryaha kala xidhan ee waayeelka, la xariir dadka daryeelka ilaalinta ku jira 1.888.357.9339.



Waxaan jeclaan lahaa inaan u mahad celino haweenka kanadiyaanka Soomaalida iyo ururka caruurta ee nala wadaagaya anaga mashruucan.

SOWCA
SOMALI CANADIAN WOMEN & CHILDREN ASSOCIATION

"Baydura oo guuday (Baydura)"

Waa inaad ku tiirsanayn daabacaddaan talobixin sharciyeed. Waxay ku siinaysaa macluumaad guud oo ku saabsan sharciga Alberta oo keliya.

Daabacaaddani waxay qiraysaa maalgelinta ay bixiso Alberta ee Waxbarashada Xuquuqda Aadanaha iyo Sanduuqa maal-gelinta Dhaqamada kala duwan.



Human Rights
Education and
Multiculturalism
Fund

Centre for
Public
cplea
Legal Education
Alberta

© June 2018, Legal Resource Centre of Alberta Ltd.
Operating as: Centre for Public Legal Education Alberta

www.cplea.ca